



tph.to/earlyabilities

Liiska Hubinta Xiriirka ee Caruurta Marka ay Dhashaan Illaa iyo afar Sano Jir

Haddii ay jawaabta MAYA tahay mid ka mid ah su'aalahan soo socda, wac Adeegyada Luqada Dugsi-bilaabida Horteed (Preschool) ee Toronto 416-338-8255.

Haddii ay luqadaada ee ilmahaagu aanu ahayn Ingiriisi, fadlan, fadlan isticmaal liistada luqadaada hooyo ee ilmahaaga. Liistooyinka ayaa lagu heli karaa luqada badan

MARKA LA GAARO 2 BILOOD

HAA MAYA

Cunugaaga miyuu maray baaristiisii/baaristeedii maqalka?

Haddii ay maya tahay, fadlan wac 416-338-8255 si aad uga samaysato ballanta baarista cunugaaga ee maqalka, lacag la'aantana ah xarunta caafimaad ee gurigaaga agtiisa ah

MARKA LA GAARO 6 BILOOD

Cunugga miyuu:

- bilaabay inuu dareen jawaabeed sameeyo markuu qaylooyin dheer maqlo?
- u jeestaa meesha dhawaaqa ama sanqartu ay ka soo baxayso?
- sameeyaa oohin kala duwan oo mid waliba ay sheegayso baahi gaar (waan gaajays nahay, waan daalanahay?
- fiirsadaa wajigaaga markaad isaga/iyada la hadlayso?
- ilka-caddeeyaa/qoslaa ka jawaabid marka aad u ilko-caddayso ama qososho?
- canjilaa qufaca ama dhawaaqyada sida ah, eh, buh?

MARKA LA GAARO 9 BILOOD

Cunugaaga miyuu:

- u jawaab celiyaa magaceeda/magaciisa?
- u jawaab-celiyaa marka uu maqlo dhawaaqa telefoonka ama garaaca albaabka?
- fahmaa marka lagu yiraahdo maya?
- ku helaa ilmuhu wuxu doonayo adeegsiga qaab jireed (ku soo laacaa si loo qaado)?
- adiga kula ciyaaraa ciyaaro bulsheed (dhuumaalaysiga) (Peek-a-Boo)
- jecel yahay inuu dadka ka ag-dhowaado?
- hadaaqaa kuna soo cel-celiyaa dhawaaqyada sida – babababa ama duhduhduh?

MARKA LA GAARO 12 BILOOD

HAA MAYA

Cunugaaga miyuu:

- raacaa jihaynta hal-tallaabo ku eg sida (fariiso)?
- si gudban uga eegaa qolka wax lagu ciyaaro marka uu qof wayn farta ugu fiiqo?
- si joogto ah u isticmaalaa seddex illaa shan erey?
- isticmaalaa astaan-muujiin jireed ama gacmeed (gacan haadiyaa asagoo ku leh iska warran/nabad-gelyo, madaxa ruxaa isagoo ula jeeda maya?
- helaa dareenkaaga isagoo isticmaalaya dhawaaqyo, astaan-muujiin jireed ama gacmeed iyo farfiiqid isagoo eegaya indhahaaga?
- kuu keenaa waxa carruurta ay ku ciyaarto si uu kuu tuso?
- jilaa ama matalaa si uu u helo dareenka bulshada iyo ammaan?
- isku keenaa dhawaaqyo fara badan sidii wax hadlaaya oo kale - abada baduh abee?
- xiiso u muujiyaa sawirka sahlan ee buugaagta?

MARKA LA GAARO 18 BILOOD

Cunugaaga miyuu:

- fahmaa micnaha gudaha iyo dibedda, dansan iyo daaran ?
- farta kugu fiiqaa in ka badan laba xubnood oo ka mid ah jirka marka la weydiyo?
- u isticmaalaa ugu yaraan 20 erey si joogto ah ?
- ku jawaab-celiyaa ereyo ama dhaqdhaqaajin jireed ama gacmeed marka la weydiyo su'aalo sahlan sida (halkee buu joogaa tedhi?, waa maxay waxaasi?)
- muujiyaa sidii asagoo ku ciyaaraya waxyaalaha ay carruurta ku ciyaarto (siiya cabbitaan tedhi, ka dhigaa baaquli sidii uu yahay koofiyad ?
- sameeyaa ugu yaraan afar shibbane dhawaaqood (p, b, m, n, d, g, w, h)?
- jecel yahay in wax loo akhriyo adigana uu kula qaybsado buugaag sahlan?
- farta ku fiiqaa sawirro asagoo isticmaala hal far?

MARKA LA GAARO 2 SANO

Cunugaaga miyuu:

- raacaa jihayn labo tallaabo ah (sida bax oo soo hel tedhigaaga kadibna tus ayeeyo)?
- isticmaalaa 100 illaa iyo 150 erey?
- isticmaalaa ugu yaraan labo magac-u-yaal sida (adiga, aniga, anigaa leh)?
- si joogto ah isugu xiraa labo ilaa afar erey oo sameeya jumlado gaagaaban sida (Koofiyadda aabbo. Gaariyoow hoos u deg)?
- ku raaxaystaa la joogista carruur kale?
- bilaabaa inuu siiyo carruurta kale waxyaabaha ay carruurta ku ciyaarto kagana daydaa carruurta kale falalka ay sameeyaan iyo ereyada ay yiraahdaan?
- isticmaalaa ereyo ay dadka kale fahmi karaan 50 ilaa 60 boqolkiiba markaas?
- si sahlan u sameeyaa ereyo iyo dhawaaqyo si hawl yaraan ah?
- u hayaa buugaagta si sax ah qaybta soo koraysa kadibna uu bogagga rog rogaa?
- akhriyaa xawayaanka cufan ama waxyaabaha ay carruurta ku ciyaarto?
- qalimo midab leh ke feegaaraa?

MARKA LA GAARO 30 BILOOD

HAA MAYA

Miyuu cunugaagu:

- fahmi karaa afkaarta la xiriirta xajmiga (weyn/yar) iyo tirada (wax yar, wax badan, ka sii badan)?
- isticmaalaa qaar kamid naxwaha dadka waaweyn sida (labo buskud, shinbir duuleysa, waan booday?
- isticmaali karaa wax ka badan 350 erey?
- isticmaali karaa ereyo fal ah sida (cararid, daadin, dhacid)?
- kala qayb qaataa hawlo uu qofba-markiisa qaadanayo caruurta le'eg, asagoo adeegsanaya waxyaabaha lagu ciyaaro iyo ereyo labadaba ?
- muujiyaa walwal marka cunug kale ay waxyeelo gaarto ama uu murugoodo?
- isku daraa falal dhowr ah marka uu ciyaar ku gudo jiro (Waxuu quudiyaa boombalo, kadibna wuu seexiyaa. Waxuu dhex geliyaa bulukeetiyo tareen markaas ayuu tareenka kaxeeya kadibna bulukeetiga ka tuuraa tareenka)?
- dhawaaqyo ag-dhigaa bilowga ereyada intooda badan?
- isticmaalaa ereyo ka kooban labo ama ka badan oo dhawaaq kala go'an leh ama dhawaaq sida (ba-na-na, kom-bu-yuuter, tu-faax) ?
- gartaa sumadaha iyo astaamaha uu yaqaano ee daabacan sida (astaanta joogsiga, jeegaanta dahabiga ah McDonalds)?
- xusuustaa uuna fahmaa sheekooyinka la yaqaan ?

MARKA LA GAARO 3 SANO

Miyuu cunugaagu:

- fahmaa su'aalooyinka kee, maxay, halkee, iyo waayo?
- samayn karaa jumlado dhaadheer isagoo isticmaalaya shan ilaa siddeed erey?
- ka hadlaa dhacdooyin la soo dhaafay (safar lagu tegay guriga awoowaha/ayeeyada, maalin la joogay xarunta lagu hayo carruurta)?
- sheegaa sheekooyin sahlan?
- muujiyaa jecaylka cunugga uu ugu jecel yahay caruurta uu la ciyaaro?
- isku hawlaa tallaabooyin fara badan oo uu ku muujinaayo sidii wax ciyaaraya oo kale (isagoo cunto karinaya ama gaari hagaajinaya)?
- u hadlaa hab sida badan dadka ka baxsan qoyska ay fahmaan waxa isaga/iyada uu sheegayo/sheegayso waqtiyada intooda badan?
- haystaa waxoogaa fahan ah shaqada waxyaalaha daabacan (buug yaraha ay ku qoran yihiin cuntooyinka yaal makhaayadaha wax laga cuno, liistooyinka, calaamadaha)?
- muujiyaa xiiso uu u qabo, iyo ka war- heyn, dhawaaqyada isku dhow?

MARKA LA GAARO 4 SANO

Miyuu cunugaagu:

- raaca jihayn ka kooban tallaabooyin ah seddex ama in ka badan (marka hore keen warqad, dabadeedna sawir masawir, ugu dambeyntana sii hooyo)?
- isticmaalaa naxwe la nooc ah kan dadka waaweyn?
- sheegaa sheekooyin kuwaasoo leh biloow, bartan iyo dhammaaba?
- hadlaa iskuna dayaya inuu mushkilado la xalliyo dad waaweyn iyo carruur kaleba?
- muujiyaa ciyaaro khayaali ah oo uu maskaxdiisa ka keenay si loo fahamona ay aad u dhib badan yahay?
- hadlaa hab isaga/iyada ay fahmayaan dadka qalaad ku dhowaad waqti walba?
- sameeyn karaa ereyo isku si u dhawaaqa (cat-bat) (bisad-fiidmeer)?
- isku aadiyaa xarfaha qaarkood iyo dhawaaqooda (xarfaka b oo loo dhaho buh, xarfaka t oo loo dhaho tuh)?

NA SOO WAC WXII KU SAABSAN CUNUG WALBA ...

- Haddii aad ka welwelsan tahay iyada/isaga xagga hadalka/horumarka luqadda.
- Haddii aad ka welwelsan tahay iyada/ isaga xagga maqalka.
- Haddii isaga/iyada xagga hadalka iyo xirfadaha luqadda aysan waxba horumar ah samayn lixdii bilood ee la soo dhaafay.
- Kaasoo mar walba soo celceliya dhawaqa iyo/ama kalmadaha (shigshiga).
- Kaasoo codkiisa uu kula yahay mid sida caadiga ka duwan ama si kale adiga kula ah.
- Kaasoo ciyaartiisa ama dhexgalkiisa bulsho ay kuula muuqato mid aan habboonayn.
- Oo lagu sheegay ama arkay bushinta/dhamxanaga faruuran, maqal dhumid, Pervasive Developmental Disorder (PDD) ama Jirrada Horumarka ee Faafsan, jirrada Ootiisim, horumar dib-u-dhacsan (kaasoo aanan helayn wax adeegyo ah).

Kahortagidda Waqtiga Hore Waa Muhiim. Wac Adeegyada Luqadda Dugsi-bilaabidda Horteed 416-338-8255 TTY 416-338-0025

**Sajilaadda Onlaynka ayaa laga heli karaa websaydkayaga
tph.to/earlyabilities**

Taariikhda la Buuxiyay: _____

Magaca Cunuga: _____

Taariikhda Dhalashada ee Cunuga: _____

Qofka Foomka Buuxiyay: _____

Cinwaanka Xiriirka: _____

Lambarka boostada: _____ Magaalo: _____

Lambarka Telefoonka: _____ Alternate Phone No. _____